

Waxaad samaynayso haddii aad dhib kala kulanto ARC

Abril 2010

Somali

Codsigaaga Kaadhka Sajilaada “Registration Card ama ‘ARC’” waa muhiim. Waxay muujinaysaa inaad samaysay codsiga magangelyada oo waxa ku yaal faahfaahintaada shakhsi iyo sawirkaaga. Waxa adeegsan kara adiga oo keliya. ARC-gaagu wuxu caddaynayaa aqoonsigaaga oo wuxu ku saamaxi ka helitaanka boostada lacagta taageerada ee ay bixiyaan Hoom Ofisku.

Xaashidan waxay qeexaysaa waxaad samaynayso haddii ARC shaqayn weydo ama lunto ama la xado, iyo sida aan kuu gargaari karno.

Maxaan sameeyaa haddii kaadhkayga ARC shaqayn waayo boosta marka aan lacagta taageerada ka soo qaadanayo?

Haddii, sababuun, kaadhkaaga ARC shaqayn waayo, ka soo soo qaado rasiidh shaqaalaha boosta oo isku-day inaad mar kale isticmaasho kaadhkaaga wakhti danbe. Waa muhiim inaad weydiiso xafiiska boosta inay isku dayaan kaadhka laba jeer. Waxaad isku-dayi kartaa isla maalintaas mar danbe ama maalin kale. *Haddii kaadhkaaga la diido laba jeer, hubi in boostada lagaa siiyo rasiidh.*

Kolka aad hayso labada rasiidh, wad noo keeni kartaa xafiiskayaga oo aanu kaa gargaari karo warbixinta dhibta loo gudbinayo Hoom Ofiska. Waa muhiim inaad keento labada rasiidhba waayo Hoom Ofisku waxay u baahan yihiin caddayn isku-daydayga helitaanka lacagta taageerada laba jeer oo aanad ku guulaysan. Fadlan keen rasiidhada toddobaadka horaantiisa. *Haddii aad dhib ka soo warbixiso kadib toddobaad tagay, Hoom Ofis ma bixiso lacag qaadashadeedu ku dhaaftay.*

Maxaan sameeyaa haddii kaadhka ARC uu lumo ama la xado?

Haddii kaadhka ARC lumay ama la xaday, waa inaad marka hore u sheegto booliiska kahor intaanad nala soo xidhiidhin. Waxaad heli doontaa warbixin booliis oo ay ku taal:

- lambarka tixraaca denbiga lagaa siiyey saldhiga booliiska (haddii mid lagu siiyey);
- magaca ama lambarka sarkaalka booliiska qaaday warbixintaada; iyo
- magaca saldhiga booliiska aad warbixinta ka dhiibtay.

Kala xidhiidhi kartaa Boolisska Strathclyde 0141 532 2000 oo iyaga ayaa kuu sheegi xidhiidhka booliiska degaankaaga oo kaa gargaari doona warbixinta.

Waxaad keeni kartaa warbixinta xafiiskayaga oo aanu kaa gargaari doono u sheegista Hoom Ofiska lumitaanka ama tuugada. Fadlan ogow inay qaadan karto dhawr toddobaad bixinta kaadhka ARC ee cusub. Inta aad sugayso kaadhka cusub, waxaan ka codsan karnaa Hoom Ofiska inay kuu soo diraan lacag degdega ah oo taageero “Emergency Support Tokens”. Kuwaas waxa keeni doona cinwaanka gurigaaga qolo boost gaara oo la yidhaa DX.

Maxaan sameeyaa haddii aana awoodi waayo inaan doonto lacagta taageera ee loo isticmaalo ARC sabab ah aniga oo cisbitaal jiifa?

Haddii cisbitaal lagu jifiyo oo aanad awoodin inaad boostada kaga soo qaadata lacagtaada kaadhka ARC, warso shaqaalahaaga bulshada, haddii aad leedahay, ama kalkaalisada inay nala soo xidhiidhaan si aan u ogeysiino Hoom Ofiska isla markiiba. Waa muhiim in sidaas dhakhso loo sameeyo si ay Hoom Ofis xaalkaaga ula socdaan. Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa **khadka bilaashka ah: 0800 085 6087**; ogow lambarkan waxa laga soo wici karaa telefon guri oo keli ah.

Haddii aanad noo soo sheegin si aanu ula socodsiiino Hoom Ofiska, taageeradaadu waa joogsan kartaa; lacagta ku dhaaftayna dib looma qaadan karo taariikh kale.

Waxaan rabaa inaan codsado ruqsadda waddista baabuurka ee gobolka. Ma u diri karaa kaadhkayga ARC caddayn aqoonsi ahaan Wakaalada Ruqsadaynta Dirawalka iyo Baabuurta (DVLA)?

Ha u dirin kaadhkaaga ARC qolada DVLA iyada oo qayb ka ah codsiagaaga si aad u hesho ruqsadda waddista baabuurka. Waxaad u baahan tahay ARC si aad lacagtaada uga hesho boostada toddobaad kasta. La'aanteed, ma awoodid inaad lacag hesho.

Laga bilaabo 25 Maarso 2010, haddii aad codsatay magangelyo gudaha UK oo **aanad** helin weli fasax aad ku sii joogto, uma qalantid inaad UK ka dalbato ruqsadda waddista baabuurka.

Isbeddelada dhawaan ee xeerka dawladda macnahoodu waa in keliya kuwa la siiyey nooc ruqsad ah in ay joogaan UK **muddo ugu yaraan ah 185 maalmood** inay u qalmaan codsashada ruqsadda UK ee waddista baabuurka.

Isbeddelkan ma saamaynayo kuwa dalbaday ruqsadda waddista baabuurka gudaha UK kahor 25 Maarso 2010.